


Imaanshaha Norway

Arrivando in Norvegia



 Aamiina
 Julie Cornelia van Walsum
 Mohamed Abdirashid
|| 5
 Soomaali  / Italiano 



LIDA Stories

lidastories.net

Imaanshaha Norway / Arrivando in Norvegia

 Aamiina


 Julie Cornelia van Walsum

 Mohamed Abdirashid (so), Andrea

Ciasca Marra (it)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



Aniga iyo labadayda walaalo waxaan nimid Norway December 2016. Waxaan xirnayn dharka xagaaga, sababtoo ah waxaan u maleynaynay inay kulushahay Norway sida Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, markii aan nimid garoonka diyaaradaha, waxaa jiray baraf. Waxaana jiray qabow, cimiladuna waa ay qaboobaayd. In kasta oo aannu dhawr boorsooyin wadanay, haddana waxaan wadanay oo keliya dharka xagaaga.


...

I miei due fratelli ed io siamo arrivati in Norvegia nel dicembre del 2016. Indossavamo abiti estivi perché pensavamo che in Norvegia avrebbe fatto caldo come in Somalia. Ma quando arrivammo in aeroporto stava nevicando. Avevamo freddo, il clima era gelido. Sebbene avessimo portato varie valigie, c'erano solo abiti estivi dentro.

Haddaan Soomaaliya joogi lahaa, waxaan filayaa inaan hadda hooyo ahaan lahaa. Laga yaabaa inaan hore u yeelan lahaa carruur badan. Haddii aan Soomaaliya joogi lahaa, ma helin fursadaha aan hadda haysto. Waxaan dareemayaa inaan nasiib leeyahay in aan ku noolaado Norway.

...


Se fossi rimasta in Somalia, penso che adesso sarei già madre. Forse avrei già diversi figli. In Somalia non avrei tutte le opportunità che ho adesso. Mi sento fortunata a vivere in Norvegia.




Inkasta oo ay gabow ahayd, aad ayaan ugu farxay markaan Norway nimid. Waxaan ugu dambeyntii la kulmi lahaa hooyaday markale, oo aanaan arag muddo lix sano ah. Hooyaday iyo laba saaxiibadeheed ayaa nala kulmay. Markaan aragnay iyadii ayaannu farxad la oohnay. Waxaan u sii raacnay magaalada yar ee ay hooyo ku nooshahay.

...

Nonostante il freddo, ero contenta di essere venuta in Norvegia. Avei finalmente riabbracciato mia madre, che non vedevo da sei anni. Mia mamma e due sue amiche erano venute a prenderci. Quando le abbiamo viste siamo scoppiate a piangere per la gioia. Ci hanno portato nella cittadina dove vive mia madre.






Maalmihii ugu horreeyay ee magaalada hooyo degantahay waxay ahaayeen kuwo la yaab leh. Qabow iyo baraf baa da'ay oo wax badan ma jirin. Waddooyinka ayaa gabi ahaanba faaruq ahaa. Dadka yar ee aan la kulmay waxay u muuqdeen kuwo aamusan oo aan wax saaxiibtinimo lahayn. Soomaaliya waxaa jiray dad meel walba jooga, sidaa darteed wax walba waxa ay dareemayeen si nooc kale ah halkan. Hooyaday iyo saaxiibadeed waxay na siiyeen xoogaa hadiyado ah, ka dibna waxay noo kaxaysay suuqa si aan u soo iibsanno dharka qabowga.

...


I primi giorni in quella cittadina sono stati molto strani. Nevicava, faceva freddo e non c'era molto da vedere. Le strade erano completamente vuote. Le poche persone che incontravo sembravano fredde e poco amichevoli. In Somalia c'è gente dappertutto, quindi qui ogni cosa sembrava estranea. Mia madre e le sue amiche ci hanno fatto dei regali, e poi lei ci ha



Sannadka soo socda waxaan bilaabi doonaa iskoolka sare ee qaybta caafimaadka iyo horumarinta dhalinyarada. Mustaqbalka waxaan rabaa inaan noqdo shaqaale dhalinyaro ah. Markaan dhammeeyo waxbarashada, riyadeydu waa inaan helo shaqo joogto ah. Waxa kale oo aan rabaa in aan barto darawalnimada oo aan helo shatiga darawalnimada.

...


L'anno prossimo andrò alla scuola secondaria, con indirizzo "sviluppo salute e gioventù". In futuro voglio diventare operatore giovanile. Quando avrò completato la mia istruzione, sogno di avere un lavoro fisso. Voglio anche imparare a guidare e prendere la patente.



Soomaaliya waliigey iskool ma dhigan mana
dhigan koorso aan ka ahayn dugsi quraan. Ma
aqoonin sida wax loo akhriyo ama loo qoro.
Hadda waxaan bartay sida loo qoro af-soomaali
iyo af-noorwiiiji, iyo maadooyin kale oo badan.
Waxbarasho la'aanteed waxaan dareemay inaan
qofna ahayn. Hadda waxaan dareemayaa inaan
ahay qof aqoon iyo farxad leh.

...


In Somalia non sono mai andata a scuola né ho
fatto corsi eccetto la scuola coranica. Non
sapevo leggere né scrivere. Ora ho imparato a
scrivere sia in norvegese che in somalo, e molte
altre cose. Senza istruzione, sentivo che non ero
nessuno. Ora mi sento informata e felice.



Kadib fasaxa Kirismaska waxaan ku biiray koorsada Norwejiga ee xarunta waxbarashada dadka waaweyn. Waxaan halkaas ku bartay laba sano ka hor intaan bilabin iskool caadi ah. Hadda waxaan ku jiraa sannadkii ugu dambeeyay, waxaan yeeshay saaxiibo badan oo cusub. Waxaan ahay qof bulshaawi ah oo waxaan ka helaa la kulanka dadka kale.

...

Dopo le vacanze di Natale, mi sono iscritta a un corso di norvegese presso un centro scuola per adulti. Ho studiato per due anni lì prima di essere ammessa in una scuola pubblica. Ora sono all'ultimo anno e ho fatto tante nuove amicizie. Sono molto socievole e amo conoscere altra gente.



Iskoolka ka dib waxaan aadaa xarun ay maamulaan dad iskaa wax u qabso ah halkaas oo aan ka helo caawinta shaqada gurigayga. Waxaan sidoo kale ku biiray koorsada harqaanka ee xarunta.

...

Dopo la scuola vado in un centro gestito da volontari dove mi aiutano a fare i compiti. Lì frequento anche un corso di cucito.